

Ogeysiis ku socdo Waalidiinta

Canugaagu waxa uu la nool yahay daryeelbixiye aanan sharci u haysan inuu hayo canugaaga. Daryeelbixiyaha waxaa loo oggolaaday kaashka Temporary Assistance for Needy Families (Kaalmada Kumeelgaarka ee loogu talagalay Qoysaska Danyarta, TANF). Division of Child Support (Qeybta Taageerada Carruurta) waxaa looga baahan yahay inay kuu sheegto in daryeelbixiyaha uu kaalmo kaash ah ku qaadanayo canugaaga, sida uu qabo WAC 388-454-0025.

Taariikhda

Community Services Office (Xafiiska Adeegyada Bulshada, CSO)

Telefoonka

1-877-501-2233

Magaca Non-Custodial Parent (Waalidka Aan Caruurtooda La Joogin Inta Badan)	Ciwaanka	Magaalada	Gobolka WA	Koodhka Boostada
--	----------	-----------	---------------	------------------

TANF waxaa loo oggolaaday canugaaga(carruurtaada) hoos ku qoran:

Waa maxay xuquuqahaaga?

Division of Child Support (Qeybta Taageerada Carruurta) waxa ay haysataa toddobo maalmood inay kugula soo xiriirto boosto in canugaaga(carruurtaada) loo oggolaaday lacag kaash ah.

Sidee u codsaneysaa ciwaanka ama goobta canuga?

- Waxaad amarka maxkamadda, xuquuqaha booqashada, ama waqtiga degganaanta, iyo bayaan la hagaajiyey oo lagu dhaartay, oo wata sawirkaa aqoonsiga, qof ahaan u geyn kartaa Community Services Office (Xafiiska Adeegyada Bulshada, CSO) ee maxalliga ah;
- Waxaad yeelan kartaa qareen kuula xiriira Division of Child Support (Qeybta Taageerada Carruurta); ama
- Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan gobolka Washington, boosto kudir codsi nootaayeysan oo sheegaya cidda aad tahay, waxa aad u tahay canuga(carruurta) iyo macluumaadka aad codsaneyso.

Division of Child Support (Qeybta Taageerada Carruurta) miyey la xiriireysaa daryeelbixiyaha marki aad codsato ciwaanka goobta?

Haa, Division of Child Support (Qeybta Taageerada Carruurta) waxa ay siin doontaa daryeelbixiyaha ogeysiis 30 maalmood ah inaad codsaneyso ciwaanka goobta canuga.

Maxaa ay daryeelayasha sameyn karaan haddii aysan u arkin inay badbaado tahay inay ku siiyan ciwaanka goobta canuga?

- Daryeelbixiyuhu waxa uu siin karaa Division of Child Support (Qeybta Taageerada Carruurta) macluumaadka walaacyadi kasta oo xadgudub ah / dayacaad ah ee uu qabo,
- Wuxuu Sabab Wanaagsan ka gudbin karaa Division of Child Support (Qeybta Taageerada Carruurta) ee Taageerada Canuga (DCS), iyada oo ay ugu wacan tahay cabsi laga qabo waxyeelleyn ta daryeelbixiyaha / canuga(carruurta),
- Wuxuu gudbin karaa gal dhageysi maamul oo Administrative Law Judge (Garsoore Sharciga Maamulka ah) ayaa go'aan kasoo saari doona haddii Division of Child Support (Qeybta Taageerada Carruurta) ay ku siin karto ciwaanka goobta.

Waa maxay adeegyada aad heli karto?

Xarunta Xiriirka Adeegga Bulshada DSHS 1-877-501-2233 ama TTY 1-800-833-6384.

Khadka JOOJINTA WAXYEELLADA ee Department of Children, Youth, and Families (Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska, DCYF), ee Gobolka Washington 1-866-363-4276.

Khadka Xogta Dhallinyarada Carartay ee Gobolka Washington 1-800-486-9612.